



## Maka wel-wel qabtaa in uu ilmahaagu bilaabo isticmaalka xashiishada, ama ma shakisantahay in uu horeba u tijaabiyey?

Waxaa aan kugu soo dhaweyneynaa koorso loogu talo galey waalidiinta oo ku saabsan xashiishada iyo aqoonta guud ee maan-dooriyaasha, waxaa qaban-qaabin doona koorsadaas Mini-Maria

*Waxyaabaha aan ka hadli doono waxaa ka mid ah:*

- Sida xashiishada iyo maan-dooriyaasha kale ay saameyn ugu yeeshaan jidhka, maanka/maskaxda iyo bulshada
- Sida aad ka waalid ahaan ugala hadli karto ilmahaaga arimaha ku saabsan maan-dooriyaasha.
- Sida xikmadeysan ee loo wajihi karo doodaha caamka ah

Waxaa aan dhowr mar ku kulmi doonaa koox waalidiin ah oo ka kooban sideed ilaa toban waalid. Dhamaan dadka qay qaadayana kulanka waxaa qabana xeerka sir qarinta. Koorsadu waa mid bilaa lacag ah.

*Weydii su'aalaha aad qabto isla markaana iska diiwaan gali:*

[foraldrautbildning.minimaria@socialresurs.goteborg.se](mailto:foraldrautbildning.minimaria@socialresurs.goteborg.se)

*Waxaa xitaa sidoo kale aad wici kartaa mid ka mid ah qaybahayaga:*

Hisingen	031-367 93 15
Centrum/Väster	031-367 99 44
Nord-Ost	031-367 92 90

Ka akhri macluumaad dheeri ah oo nagu saabsan:

[minimaria.se](http://minimaria.se)